

PLI516 (Rev 1)

Dabacsanaanta shaqooyinka: xaq u la'haansho in la waydiisto

Soo koobid asaasi ah

Dawlada waxaa ka go'an in ay caawiso waalidiinta shaqeeya. Laga bilaabo bisha April ee 2003 waalidiinta haysta caruur ka yaryar lix sanadood amaba ay caruurtoodu ay naafo tahay oo da'dooduna ay sideed iyo toban ka yar tahay waxaa ay xaq u leeyahiin in ay dalbadaan in shuruudaha lagu shaqeeyo loo dabciyo waxaana cidda ay u shaqeeyaan ay masuuliyadi ka saaran tahay in ay si wayn u tix geliyaan dalabkaasi.

Isla markaa, dawladu waxaa ay sii kordhinaysaa oo fasaxa umusha loo qaato iyo mushaharkaba, waxaana ay soo saaraysaa xaq uu qofka korinaya ilmo aanu dhalin u leeyahay in lacag lagu siiyo iyo fasaxa la siiyo aabayaasha ay haweenkoodu dhalayaan. Xuquuqahaasi, marka lagu daro kuwa imikaba jira ee fasaxa ay ku qaataan waalidku iyo caruurtooda oo fasax loo siiyaa, waxaa ay walidiintu ku helayaan fursado dheeraad ah oo aan weligood soo marin oo ay isugu miisaami karayaan shaqada iyo nolosha qoyskooda, isla markaasna waxaa ay la jaan qaadaysaa oo faa'iidona ay u leedahay hufnaan u socodka ganacsiga

Qoraalkani waxuu ku siinayaa macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan xuquuqda aad u leedahay in aad dalbato in shuruudaha shaqada lagu dabciyo. Ma'aha mid si faahfaahsan u qeexaya wax waliba mana aha in loo qaato inuu qodob sharci ah yahay.

Qoraalkaan nukulkiisa ugu dambeeyay waxaad ka heli karaysaa internetka cinwaankiisu yahay www.dti.gov.uk/er/flexible.htm. Waxaad ka helaysaa macluumaad intan ka faahfaahsan oo kugu hagaya shuruudaha shaqada ee la dabciyay xuquuqda aad u leedahay inaad dalbatid iyo waajibka kaa saaran inaad tix gelisid Waxaa kale oo aad isla boggaasi aad ka helaysaa tilmaamaha dadka loo shaqeeyo iyo shaqaalahaba - *Flexible working: The right to request and the duty to consider: Guidance for employers and employees (PL520)*

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arimaha la xidhiidhka shaqaalaha, ooay ku jiraan waxyaabahan ugu dambeeyay ee ku soo kordhay ee ku saabsan xuduudka uu qofku u leeyahay inuu dalbado shaqada loo dabciyo, fiiri www.dti.gov.uk/er

February 2003

Xuquuqda aad inaad dalbato shaqo dabcin

Laga bilaabo 6 bisha April ee 2003 waalidiinta haysta caruur ay ka yaryar lix jiro amaba caruur Naafo ah oo ay da'doodu ka yar tahay 18 jir waxaa ay xaq u yeelanayaan inay dalbadaan in shaqada loo dabciyo waxayse tahay in ay shaqaynayaan muddadii taasi xuquuqda loogu yeelanayay. Dadka loo shaqeeyo waxaa ay masuuliyadi ay ka saran tahay in ay dalabyada sidaasi ah ay tix gelin wayn siiyaan.

Xuquuqdaasi waxaa ay u suurta gelinaysaa hooyooyinka iyo aabayaasha in ay dalbadaan in shaqada loo dabciyo. Mana aha in qofka shaqaalaha ahi marka uu dalabkaasi sameeyo uu mar walba helayo, iyada oo mar *walba* la tix gelinayo duruufka jirta, haddii aanay cidda loo shaqeeyaa aanay bixin karaynin wakhtiyada uu doonayo inuu qofka shaqaalaha ahi uu shaqeeyo. Xuquuqahan waxaa loo soo saaray in ay kaafiyaan baahiyaha ay qabaan waalidiinta iyo cidda loo shaqeeyaba, gaar ahaana meelaha aan waawaynayn ee laga shaqeeyo, waxaana looga gol leeyahay in lagu aburo in laga doodo oo laguna dhiiri geliyo dadka shaqaalaha ah iyo cidda loo shaqeeyaba in ay ka fiirsadaan in shaqo dabcinta oo ay helaana xal labada dhinacba u cuntami kara. Qofka shaqaalaha ah waxaa ay masuuliyadi ay ka saarran tahay inuu si taxadar leh uu uga fiirsado xilliyada uu doonayo inuu shaqeeyo marka uu arjiga qoranayo, cidda loo shaqeeyana waxaa loogga baahhan yahay in ay raacaan hab gaar ah si ay hubaal uga dhigaan in dalabyada noocaasi ah si wayn loo tix geliyo.

Yaa taasi dalban kara ?	Isbeldo nooc ee ah yaa la dalban karaa ?
<p>Si uu qofku u sameeyo dalab uu ku helayo xuquuqdan cusub waa inuu Qofku ahaadaa :</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shaqaale • Haysto ilmo ka yar lix jir, ama ilmo naafo ah oo ka yar sided iyo toban jir. • Waa inuu yahay midkood <ul style="list-style-type: none"> - Ilmaha hooyadii, aabahii, ama uu ilmaha koriyo oo sidii waalid oo kale uu u yahay, qofka ka masuulka ah. ama ilmaha uu si ku meel gaadh ah u koriyo hababka shaqada, <ul style="list-style-type: none"> Ama - uu qabo amaba la nool yahay ilmaha hooyadii, aabahii, qofka ilmaha haya ama ka masuulka ah iyo qofka uu si ku meel gaadhka ah ilmahu ula nool yahay • Uu shaqeeyay qofka dalabka samaynayaa cidda uu u shaqeeyo muddo 26 todobaad ah si aan kala go' lahayn ugu shaqaynayay maalinta uu arjiga samaynayo. • Sameeyay codsiga wakhti ay laba todobaad ka yari ka hadhsaneyn marka uu ilmahu lix jirka noqonayo, amaba ilmahiisu naafo yahay ay laba todobaad wax aan ka yarayni aysan ka hadhsaneyn marka uu ilmahu sided iyo toban jirsanayo • Waa in qofka koriinka ilmaha ay masuuliyadi ka saarran tahay amaba uu filayo in ay masuuliyadaasi ay dusha ka fuulayso 	<p>Shaqaalaha xuquuqda u lihi waxaa uu dalban karaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • In wax laga bedelo saacadaha uu shaqeeyo • In wax laga bedelo wakhtiga looga bahhan yahay in ay shaqeeyaan. • Inuu gurigiisa ku shaqeeyo <p>Waxaana ay arintani ay saamaysaa hababka shaqada ee ay ka midka yihiin inta saacadood ee uu qofku shaqeeyo sanadkii oo lagu celceliyo, saacadaha oo goortii uu doono uu qofku xoog u shaqeeyo, waqtiga ku haboon uu shaqeeyo, guri ku shaqayn, shaqo wadaag, kala duwasho xiliga shaqada, qof kale oo uu shaqada la wadaago, xilliyo kala duwan oo uu shaqeeyo, qofka oo shaqada ku hadha marka shaqaalaha intoodda kale ay rawaxaan (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kala laguugu dabcin karo iyo faa'iidada taasi ganacsiga ugu jirta waxaad ka daalcan kartaa www.dti.gov.uk/work-lifebalance).</p>

- marka uu qofku samaynayo arjiga uu ilmaha ku haynayo
- Waa inaanu u shaqaynin xafiisyada shaqaalaha dira (agency)
- Waa inaanu ciidamada ka mid ahayn
- Waa inaanu laba iyo tobankii bilood ee tagay samaynin arji kaleoo uu ku dalbanayo in shuruudaha shaqada loo dabciyo

Habka la raacayo

Isaga oo kooban habka la raacayaa waxaa weeye:

Sida aad wax uga qabanaysid dalab uu kuu soo gudbiyay qof shaqaalahaaga ah oo doonaya in shaqada loo dabciyo?

Isaga oo kooban, habka la raacayaa waxaa weeye Sidaan soo socota:

- Waa mid u taalla qofka shaqaalaha ah inuu arji uu ka fiirsaday uu qoraal ahaan ku soo gudbiyo. Waxaanay shaqaalaha dalabkaasi samaynayaa sida ay xuquuqdani u ogolaanayso ay dalaban karaan sanadkii mar keliya, arajida la dalbadaana waxaa ay ka dhigan yihiin inuu si **rasmi** ah uu isu bedelay xaaladahii iyo shuruudahii uu qofku ku shaqaynayay, haddii aanay labada dhinac isla garanin in aanay waxba iska bedelin xaaladahii uu qofku shaqaynayay mooyaane. Sidaasi daraadeed waa, ka hor inta aanad arjiga gudbinin waa inuu qofka shaqaalaha ahi uu si degan uga fiirsadaa habka ugu wanaagsan ee shaqada ee u saamaxaya inuu daryeelka ugu wanaagsan uu ilmahiisa siiyo; waa in la islana eegaan sidii meesha loogu dari lahaa waxii saamayn ah ee dhinaca dhaqaalaha ah ee laga yaabo in ay arintaasi keento mararka habka shaqada ee loo baahhan yahay uu la imanayo in ay mushahaarada qofku hoos u dhacdo iyo waxii saamayn ah ee ay ku keenayso ganacsiga cidda loo shaqeeyo.
- Waa in **28 maalmood** gudahood marka dalabku uu soo gaadho ay cidda loo shaqeeyaa ay diyaariso in ay la kulanto qofka shaqaalaha ah. Waxaa ay taasi siinaysaa cidda loo shaqeeyo iyo qofka shaqaalaha ahba in ay helaan fursad ay kaga wada hadlaan habka shaqada loo qabanayo, oo ay kana wada xaajoodaan sida ugu wanaagsan ee arintiisa loo meel marinayo. Waxaa kale oo taasi ay fursad u siinaysaa in ay ka fiirsadaan hababka kale ee uu qofku u shaqayn karo, haddiiba ay dhibaato ka jirto in la ogolaado habka shaqada ee uu qofka shaqaalaha ahi uu arjigiisa ku soo gudbiyay. Qofka shaqaalaha ahi waxaa uu samayn karaa haddii uu doonayo qofka uu rabo inuu la shaqeeyo.
- Waa in **14 maalmood** gudahood marka uu kulankaasi dhaco ay cidda loo shaqeeyaa waraad ay u soo qortaa qofka shaqaalaha ah, taasoo ama loogu ogolaanayo looguna sheegayo maalinta uu bilaabay ama qofka loo shaqeeyaa uu soo cadeeyaa sababta uu codigaa loo diiday iyo habka uu codsigaa wax uga badali karo. inta badana arimahaasi waxay ku dhamaadaan in xal loo helo.
- Dhamaanba wakhtiyada la isla garto in hawsha sidaasi lagu sii waddo waa in ay isku raacaan cidda loo shaqeeyo iyo qofka shaqaalaha ahiba. Waxii wakhti ah ee la kordhinayo waa in cidda loo shaqeeyaa ay qoraal ahaan ku samaysaa oo nuqul qoraalkaasi ka mid ahna la siiyaa qofka shaqaalaha ah.

Qofka shaqaalaha ahi miyuu racfaan ka qaaddan karaa go'aanka laga gaadho?

Haa. Waxaa uu habkan la raacayaa dhigayaa inuu qofka shaqaalaha ahi uu xaq u leeyahay inuu racfaan ka qaato go'aanka cidda uu u shaqeeyaa ay ka gaadhay isaga oo taasi ku smaayanaya muddo 14 gudahoodda ah markii go'aankaasi lagu war geliyay. Hanaanka racfaan qaadashada waxaa loogu talo galay in meesha lagu daro ujeedada guud ee ah in cidda loo shaqeeyo iyo qofka shaqaalaha ahba lagu dhiiri geliyo in ay isla gaadhaan go'aan fiican oo ay ka gaadhaan goobta shaqada.

Marar aan badnayn ayaa waxaa dhici karta in shaqaalaha qaarkood aanay halkaasi kaga hadhin ee ay dalbadaan in cid sadexaad ay arinta soo fara geliso. Waxaanay taasi noqon kartaa in ay dalabkoodda u gudbiyaan ACAS, guddiga garsoorka shaqada, amaba ay isticmaalaan hab kale oo muranada loo xaliyo. Qofka shaqaalaha ah xaalado gaar ah ayuu ugu suurta geli karaysaa inuu dalabkiisa u gudbiyo guddiga garsoorka shaqada. Xaaladaha noocaasi ah waa in cidda loo shaqeeyaa ay guddiga u muujisaa in ay sidii saxa ahayd u raaceen habka.

Sharcigan cusub ee waalidiinta haysta da'yarta amaba caruurta naafada ah xaqa u siinaya in ay dalbadaan in la siiyo hab shaqada loogu dabcinayo tasoo dheeraad ku ah, hase ahaatee uu gebi ahaanba ka madaxbanaan, sharciyada kale, ee u degsan inaan dadka lagu faquuqin rag iyo dumar hadba ka uu qofku yahay, midab takoorka, naafa nimada iyo qofka isirkiisa.

Xuquuqaha kale ee lagu daryeelayo qoysaska

Isbedelka xuquuda dhalmada

Waxaa wax laga bedelay xuquuqaha imika jira ee ay helaan dhalmada, waxaana la kordhiyay wakhtiga ay fasaxa ku maqnaanayaan iyo lacagta ay qaadanayaan, waxaana la kordhiyay oo kale lacagta ay qaataan haweenka umulaha ahi. Haweenka marka ay umulayaan ay ka bilaabmayso amaba ay ka dambayso 6 bisha April ayaa ka faa'iidaysanaya fasaxa cusub ee haweenka uurka leh iyo xuquuqda ay lacagta ku helayaanba

Qoraal aasaasi ah oo macluumaad ka bixinaya wax ka bedelka lagu sameeyay fasaxa haweenka umulaha ah - *Maternity leave – changes* (PL507) waxaa uu kuugu diyaar yahay bogga internetka ee www.dti.gov.uk/er/maternity.htm ama qoraalka DTI oo aad ka dalban karaysid. (Faahfaahinta ku saabsan halka aad kala xidhiidhi karaysaa waxaa ay ku jirtaa qaybta ka hadlaysa meelaha aad ka heli karaysid haddii aad macluumaad dheeraad ah u baahsan tahay)

Xuquuqda cusub ee aabahu ku helayo fasax loo siiyo marka uu ilmo u dhalanayo

Xaqa uu aabahu u leeyahay inuu helo fasax marka uu ilmo u dhalanayo ayaa la soo saaray. Shaqaalaha taasi xaqa u lehi waxaa ay qaaddan karaan ilaa laba todobaad oo fasax ay mudhahaaradoodii u soconayso ah oo ay ku daryeelaan ilmahooda cusub oo ay kuna taageeraan hooyada. Xuquuqdaasi waxaa ay u furan tahay shaqaalaha la filayo in ay caruurtoodu dhalato, bisha April 6 2003 amaba waxii ka dambeeya

Qoraalka macluumaadka aasaasiga ah ka bixinaya fasaxa uu aabahu heli karo marka uu ilmo u dhalanayo iyo mushaharkiisa sida uu u qaadanayo - *Paternity leave and pay* (PL514) waxaa uu diyaar kuugu yahay www.dti.gov.uk/er/paternity.htm ama qoraalada DTI. oo aad ka dalban karaysid (faahfaahinta ku saabsan halka aad kala xidhiidhi karaysaa waxaa ay ku jirtaa qaybta ka hadlaysa meelaha aad ka heli karaysid haddii aad macluumaad dheeraad ah aad u baahan tahay)

Xuquuqaha cusub ee ay leeyahiin in ay faxas ay lacagtoodu soconayso ay qaataan waalidka caruur aanay dhalin koriyaa

Waxaa la soo saaray xuquuq uu fasax ay lacagtiisuna u soconayso uu ku helayo qofka koriya ilmo aanu dhalin. Xuquuqdaasi waxaa helaya shakhsiyaadka haya caruur aanay dhalin oo ay koriyaan, ama qof ka mid ah labada qof ee ilmaha wadda koriya. Waxaa kale oo la soo saaray xaqa uu ninku u leeyahay inuu helo fasax ay lacagtiisuna u socoto oo uu ku helayo qofka kale ee lamaanaha ay yihiin amaba qofka ilmaha ku qoran ee koriya. Shaqaalaha ilmaha lagu qoro si ay u koriyaan bisha April 6 amaba kadib sanadka 2003 waxaa ay ka faa'iidaysanayaan xuquuqda ay dadka ilmo aanay dhalin koriyaa ay u leeyahiin in ay helaan fasax ay lacagtooduna u soconayso

Qoraal macluumaad dheeraad ah ay ka helayaan waalidiinta koriya ilmo aanay dhalin xuquuqda ay u leeyahiin in ay helaan fasax ay lacagtoodana qaadanayaan - *Adoptive parents: rights to leave and pay* (PL515) waxaa uu diyaar kuugu yahay www.dti.gov.uk/er/adoption.htm ama qoraalada DTI oo aad ka dalban karaysid (faahfaahinta ku saabsan halka aad kala xidhiidhi karaysaa waxaa ay ku jirtaa qaybta ka hadlaysa meelaha aad ka heli karaydis haddii aad macluumaad dheeraad ah u baahan tahay)

Xuquuqaha ku saabsan fasaxa waalidiinta iyo fasaxa loo qaato caruurta

Shaqaalaha, oo ah aabaha iyo hooyadubu ee muddo sanad ah u shaqaynayay goobta ay ka shaqeeyaan waxaa ay imikaba xaq u leeyahiin in ay helaan 13 todobaad oo aanay mushahar lahayn oo fasaxa waalidiinta ah si ay u daryeelaan

ilmahoodda. Fasaxa waalidiinta waxaa sida caadiga ah la qaaddan karaa ilaa shan sanadood laga bilaabo marka uu ilmahu dhashay, haddii aad koriso ilmo aanad dhalina waxaa aad fasaxaasi qaddan karaysaa ilaa shan sanadood laga bilaabo marka ilmahu uu kugu soo biiray (ama marka uu ilmahu 18 jir noqdo haddii ay taasi ka soo horaynayso).

Waalidiinta haysta ilmo naafo ah waxaa ay iyaguna xaq u leeyahiin in ay qaataan 18 todobaad oo fasax ah (waxaa ay taasi hore u ahayd 13 todobaad) ilaa laga gaadhayo marka uu ilmahu 18 jir noqonayo, waase in ay shaqaynayaan xilligii ay taasi xaq ugu yeelan lahaayeen.

Dhamaanba shaqaalahuna waxaa ay xaq u leeyahiin in ay qaataan wakhti macquul ah oo (Mushahaaro la'aan ah) oo ay shaqada ka maqnaan karaan si ay wax uga qabtaan xaalad degdeg ah oo ku timi amaba xaalad lama filaan ah oo ku timi caruurtoodda amaba ilmaha ay ka masuulka yihiin.

Tilmaamo dhamays-tiran oo ku saabsan xuquuqda fasaxa waalidiinta - *Parental leave* (PL509) waxay kuugu diyaar tahay www.dti.gov.uk/er/individual/parental.pdf ama qoraalada DTI ee internetka.

Qoraalka ku tusaalaynaya xuquuqda aad u leedahay inaad wakhti fasaxa ah aad shaqadaadda ka qaadatid si aad wakhti ugu heshid caruurtaadda - *Time off for dependants* (URN 99/1186) waxaad ka helaysaa www.dti.gov.uk/er/time_off_dependants.htm ama telefoonka laga dalbado qoraalada DTI (halka aad kala xidhiidhaysaana waxaa ay ku jirtaa qaybta ka hadlaysa haddii aad macluumaad dheeraad ah u baahan tahay)

Macluumaad dheeraad ah

- Faahfaahinta ku saabsan xuquuqahan waxaa ay diyaar kuu noqonayaan marka ay baarlamaanku ogolaadaan-waxaana la filayaa in ay taasi noqon dhici doonto dabayaaqada sanadka 2002.
- Shaqaalaha iyo cidda loo shaqeeyaaba waxaa ay isticmaali karaan bogga internetka ee DTI (www.dti.uk/er/review.htm) iyo bogga kale ee la xidhiidha ee (www.tiger.gov.uk) si aad u ogaatid inaad xaq u leedahay xuquuqdaasi
- Buug yaraha ku hagaya ee qoraalkan lagu soo qaaday waxaa uu diyaar kuugu yahay qoraalada DTI ee aad ka dalban karaysid 0870 1502 500 ama waxaad ku dalban karaysaa internetka uu cinwaankiisu yahay www.dti.gov.uk/publications
- Talooyin dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada la xidhiidha shaqaalaha, oo uu ku jiro sharcigan cusub iyo habka ugu wanaagsan ee la raaco aad ka heli karaysaa xafiisyada ACAS (www.acas.org.uk) ama adiga oo telefoon u dira laynkoodda wadanka oo dhan ee caawimada laga raadsado oo ah (08457 47 47 47)
- Ganacsiyada yaryari waxaa ay iska diiwaan gelin karaan www.businesslink.org si ay u helaan qoraalo xusuusin ah iyo kuwa wax lagu daray oo ku saabsan is bedelada lagu sameeyo sharciyada shaqaalaha. Waxaa kale oo kuu diyaar ah macluumaad ku saabsan gargaaro badan oo kala duwan oo la siiyo ganacsiyada yaryar
- Macluumaadka ku saabsan dhamaanba sharciyada u degsan shaqaalaha waxaa sida caadiga ah laga heli karaa oo ku siin kara xisaabiyayaasha, rugaha talo bixinta dadwaynaha citizen advice bureaux, ururada qolayaha wax shaqaaleeya, la taliyayaasha dhinaca sharciga, qaybaha qaabilsan mushahaarooyinka yaryar ururada shaqaalaha iyo meelo kale oo ka mid ah qaybta sida gaarka ah loo leeyahay iyo ururada mutadawaciinta ah.